Xafiiska Kormeeraha Waxbarashadda Dad Shacabka
(Office of Superintendent of Public Instruction)
Chris Reykdal, Kormeeraha Guud ee Gobolka

*Dhamaan ardaydu waxay isku diyaariyaan nolosha, nolosha shaqo iyo siday bulshada ula macaamili lahaayeen dugsiga sare kadib.*

# Anshaxa Dugsiyada: Tilmaamta Waalidka

## Habdhaqankee ayaa keeni kara anshax marin?

Degmo dugsi kastaa waxay leedahay shuruuc, kuwaas oo ka kooban sharciga gobolka, oo lagu sharaxayo habdhaqanada noocee ah ee la ogol yahay iyo kuwa aan la ogolayn. Tusaalayaasha qaar waxaa kamid ah dagaalka, cawaandada, amar diidada, ama cabista khamrida mamnuuca ah. Ardayda, waalidiinta, iyo qoysasku waa inay kala qayb galaan degmada diyaarinta iyo wax ka badalka shuruucda, shuruucdana waa inay heli karaan dadku. Hadii aanad garanaynin shuruucda anshax marinta degmadaada, ka dalbo nuqul maamulaha ama maamulka dugsiga. Hadii aad danaynayso in la badalo shuruucda anshax marinta deegaanka, waxaa isku daydaa inaad kasoo qayb gasho kulamada gudida maamulka dugsiga ama la xadhiidha maamulka degmada si aad u waydiiso sida aad hawshaa uga qabqaadan karto.



## Talaaboo nooee ah ayay degmada dugsiga qaadaa si ay uga jawaabto habdhaqanka dagaalka?

- Barista ama dib u barista waxyaabaha ka reebay habdhaqanka
- Fikir celin hadalka ah ama qoraal ah
- Wargalinta ama shirka waalidka
- Kormeerka oo la badiyo
- Waxyaabaha qaar in laga mamnuuco
- Meel ku hayn qadada ama qadada kadib
- La socodka handhaqanka ama heshiis handhaqan
- Ganaax wax u diido dugsiga gudihiisa ama dugsiga banaankeeda ah
- Nidaamka cadaadada soo celinta
- Adeegyada la talinta ama habdhaqanka
- Adeegyada gaxaana ah ee bulshada ama dib u xabisid
- Adeegyada taageerada ardayda

*In nabur la gaadhsiiyo dardayda ama in laga qaado cuntada ardayda taas oo lagu ganaaxayo waa mamnuuc.*

## S: Goorma ayuu macalinku ka saari karaa ardayda fasalka, waana maxay talaabada xigtaayi?

Macalinku waxa uu ardayda uga saari karaa fasalka habdhaqan xun oo rabshada ku ah nidaamka wax barasho. Tan waxaa loo yaqaan “rabshada fasalka.” Rabshada kahor, macalinku waa inuu isku dayaa inuu caawiyo ardayda si uu ugu dhaqmo wixii looga fadhiyo. Shuruucda habdhaqanka cusub waxaa lagu dhiiri geliyaa dugsiyada inay isticmaalaan qaab wanaagsan iyo kaliya inay ardayda saaraan marka xal kale la waayo. Hadii habdhaqanka ardaydu khatar ku yahay dadka kale ama uu mushkilad wayn ku yahay nidaamka waxbarasho, macalinku waa inuu ka saaraa ardayda oo uu sida ugu dhakhsaha badan u wargaliyaa maamulaha.

Sharciga cusub ee gobolku waxa uu dhigayaa in dugsiyadu wargaliyaan waalidka wixii rabshad fasalka dhaxdiisa ah sida ugu dhakhsaha badan. Shuruucda cusub waxay sidoo kale dhigayaa in la raaco nidaamka eryida hadii aan loo ogolayn ardayda inuu kusoo noqdo fasalka maalmaha soo socda ee waxbarasho ama hadii ardayda loo diray guriga maadaama oo uu rabshad ka sameeyay fasalka. Waalidiinta iyo ardaydu waxay leeyihiin xaq ah inay diidaa rabshada fasalka dhaxdiisa oo ay isku dayaan inay murankaa ay ka murmeen ay meel isla dhigaan degmada.

## Mudo intee le'eg ayay degmada dugsiga ka horjoogi kartaa ardayga ama ka eryi kartaa dugsiga ardayda?

Eryista iyo ka horjoogsiga dugsiga arday waa inay yeeshaan wakhti ay ku eeg yihiin kamana badan karaan tirada maalmaha waxbarasho ee shuruucda waxbarasho ee dugsiga (sida seemistar ama sadex bilood).

Shuruucda ka horjoogsigu waa inayna ka badan 10 maalmood ee xidhiidh ah oo waxbarasho. Sidoo kale, sharciga gobolku waxa uu xadidayaa tirada maalmaha dugsiyada ee degmada dugsigau bixin karto ee ka horjoogsiga dugsiga ardayga gaarka ah. Ardayda dugsiga xanaanada caruurta ilaa fasalka afaraad lama ganaaxi karo wax ka badan 10 maalmood oo waxbarasho seemistarkii waxbarasho. Ardayga fasalka shanaad ilaa 12 mala ganaaxi karo wax ka badna 10 maalmood oo waxbarasho haaf seemistarta ama shan iyo toban maalmood oo waxbarasho inta lagu jiro seemistar kaliya.

Eriyada mudada dheer sanadka xiga uma gudbi karto.

Eryisku kama badan karo seemistar ama haaf seemistar. Labada laga soo reebaa waa ku xadgudubka xeerka hubka iyo sidoo kale marar dhif ah waxaa dhacda in maamulka degmadu ansixiyo dalab lagu dheereynayo mudada eriska wixii caafimaadka iyo badbaadada shacabka la xidhiidha.

## Dugsiyada degmada ma ku khasabaa inay ardayga waxbarashada uga hor joogsadaan ama ay ku eryaan habdhaqanada qaar ardayda?

Sharciga gobolka ma waajibinayo inay degmada dugsigu waxbarashada kaga horjoogsato ama ku erido ardayda habdhaqanada qaar. Sharciga federalka waxa uu waajibinayaa eriska wixii xad gudub hub ah. Sharciga degmadu waxa uu u ogol yahay degmada inay isticmaasho eryis ama ka horjoogsi waxbarasho oo mudo dheer ah kaliyaha habdhaqanada qaar khatar ah. Degmada dugsigu waxay qaadan karaan shuruucda u ogolaanayaa waxbarasho ka horjoogsi ama eryid xad gudubyada habdhaqana qaar, laakiin sharcigu waxa uu ku dhiiri geliyaa degmada dugsiga inay isla eegto talaabo kale kahor inta aynu kusoo rogin ka hor joogsi waxbarasho ama eryis.

## Hadii ay timaado dhacdo habdhaqan, ma inaan ardaygayga wakhti hore kasoo doonaa dugsiga ama inaan ka ogolaado in ardayga wakhti hore dugsigu guriga usoo diro?

U soo dirida ardayga wakhti hore guriga ama dalabka inuu ardaygu joogo dugsiga wixii edebdaro ah ee ganaax ah (xataa hadii dugsigu go'aamiyo "hore inuu loo sii daynayo" ama "qaadida ardayga" ama "maalin uu ka maqnaado" ama wax kale). Kahor inta aanu dugsigu ilmaha guriga u dirin maalintaas habdhaqanka ardayga dartiis, dugsigu waa inuu macluumaadka ka dhagaystaa ardayga. Dhagaysigan waxa uu ardayga fursad u siinayaa inuu sharixi karo habdhaqankiisa. Taas oo loo yaqaan "nidaamka socda." Dhagaysigu waxa uu sidoo kale:

1. La socodsiiyaa ardayga sharciga habdhaqanka ee uu jabiyay;
2. U sharixid cadaymaha habdhaqanka; iyo
3. U sharixida talaabada anshax marinta.

Sharciga gobolku waxa uu mamnuucay degmada dugsigu inuu ardayga u dirto guriga ama inay u sheegto waalidka inuu ardayga guriga ku hayo wixii edeb daro ah kahor inta aanu dhagaysan. Iyada oo waalidku cadayn karo in dugsigu ardayga siiyay fursada nidaamka socda ee waxbarasho ka horjoogsiga, waalidka khasab kuma aha inuu ogolaado inuu ardayga dugsiga ka qaado ama inuu dugsiga u ogolaado inuu ardayga guriga u diro.

## Siday wax noqonayaan hadii degmada dugsigu ilmahayga dugsiga uga saarto xaalad gurmad degdeg ah?

Degmada dugsigu waxa ay si dhakhso ah uga saari kartaa ardayga dugsiga marka hore iyada oo aan qaban wax dhagaysiga ardayga ah. Waxaa loo yaqaan “eriska xaalada degdeg ah.” Waxay ku kooban tahay xaalahada ay degmada dugsigu u aragto in joogitaanka ardaygu dugsiga ay keeneyso kharash iyo inay sii soconayso:

1. Khatarta ardayda kale ama shaqaalaha dugsigu uu u leeyahay; ama
2. Khatar khalkhal gelin nidaamka waxbarashada ah.

Eriska degdega ah waa in aan uu ku eekaadaa ama loo badalaa talaabo kale oo anshax marin 10 maalood gudaheed. Degmada dugsigu waa inay la socodsiisaa waalidka eriska xaalada degdeg ah iyo xaqa ay u leeyihiin inay ambiilka ka qaataan 24 saacadood kamid marka degmada dugsigu ardayga ka saartay dugsiga.

## Waxbarashadii ilmaha u socotayna maxaa laga yeelayaa mudada ka horjoogsiga waxbarashada ama eryiska?

Inta ardaygu ku jiro eryiska, waa in degmada dugsigu ay ardayga siisaa wixii waraaqo waxbarasho iyo laylisyada guriga lagaga shaqaynayo ee dhamaan duruusta fasalka ardayga ah oo dhan. Degmadu waa inay sidoo kale u diyaarisaa nidaam uu shaqaalaha ku heli karo kuwaas oo taageero siinaya ardayga si uu ila socda duruusta ama fasalada wakhtigan. Degmada dugsigu waxay siin kartaa adeegyadan waxbarasho ardayga inta uu jiro eriska oo dhan, isaga oo guriga jooga, ama xarun kale oo degmada dugsiga ama bulshada dhaxdeexa ah.

Wixii ganaax mudo dheer ah, degmada dugsigu waxay ku dari kartaa ardayga barnaamij waxbarasho oo kale sida khibrad waxbarasho oo kale (ALE).

## Marka ardayga waxbarashada laga hor joogsado ama mudo dheer la eryo, waa maxay nidaamka dib loogu soo celinayo dugsigu?

Sharciga gobolku waxa uu dhigayaa in degmada dugsigu inay la kulanto waalidka iyo ardayga si loo sameeyo qorshaha dib u habaynta. Kulanka waa in la qabtaa 20 maalmood gudahood ama wakhti aan ka danbaynin shan maalmood kahor dhamaadka waxbarasho ka horjoogsiga ama eriska. Kulanka waa in la qabtaa wakhti ka horeeya hadii waalidku dalbado kulan wakhti hore ah. Marka lala samaynayo qorshaha waalidka, degmada dugsigu waxaa looga baahan yahay inay ku xisaabtanto:

- Nooca iyo xaalada dhacdada anshax marinta;
- Taariikhda dhaqanka ardayga iyo macnaha guud, dhaqanka qoyska iyo habaadii’dooda, iyo khayraadka bulshada;
- Gaabinta mudada dheer ee waxbarasho ka horjoogsiga ama eriska;
- Taageerada waxbarasho iyo wixii aan waxbarashada ahayn si ardayga loogu hago guusha waxbarasho; iyo
- Taageerada ardayga, waalidka, ama shaqaalaha dugsiga waxaa dhici karta inay baajiso inay dhacdo lamid ah mar kale

Ogosoonaw in kulmada dib u habaynta iyo qorshayntu ay ka duwan yihiin nidaamka ambiilka anshax marinta iyo ogolaanshaha dib ugu ogolaanshaha.

## Waxaa maxay sababta ardayga loo siinayo waxbarashada gaarka ah—ma isla sharci ayaa ka wada waajiba?

Haa. Sharciga gobolka iyo federalku waxa uu siiyaa ardayga badbaado inuu helo adeegyada gaarka ah ee waxbarshada. Degmada dugsigu waa inay raacdaa sharciga federalka iyo gobolka wixii ku saabsan ardayga lasiiyo adeegyada waxbarashada gaarka ah. Wixii macluumaad dheeraad ah ee helitaanka OSPI Waxbarashada Gaarka ah ee Habdhaqanka iyo Anshax Marinta iyo Qaybta 504 iyo Ardayda Laxaadka La’ websaytka.

## Maxaan samayn kartaa hadii aanan ku qancin waxa uu dugsigu ka sheegayo ilmahayga ama go’aanka anshax marinta degmada dugsiga?

Ka doodida talaabada degmada dugsigu way ku kala duwan yihiin noocyada anshax marintu. Guud ahaan, ardayga iyo waalidiintu waxay kaga doodi karaan go’aanka anshax marinta sadex heer:

- Heerka 1: Heer dugsi, caadiyan maamulaha dhismaha
- Heerka 2: Heer degmado, caadiyan maamulka degmada dugsiga
- Heerka 3: Heer gudida maamulka dugsiga, kuwaas oo ah gudiga maamulka dugsiga ama gudida ambiilka anshax marinta

Ogsoonoow: Wixii waxbarasho ka horjoogsasho, eris, iyo eriska xaalada degdeg ah, waalidka ama waalidka waa inay u sheegaan degmada rabitaankooda go'aankooda inay doonayaan inay ka doodaan wakhti macquul ah kahor. Marka ay la xidhiidhaan degmada dugsiga, ardayga iyo waalidiinku waa inay kaydiyaan dhamaan wixii xidhiidh ah ee ay is waydaarsadeen oo ilaa inta u macquulka ah badanaa qoraal kula xidhiidhaan.

## Muxuu gobolka la filanayaa si uu u taageero ardayga iyo qoysaska wixii ku xeeran anshax marinta?

Xafiiska Kormeeraha Guud Ee Waxbarashada Dadweynaha (Office of Superintendent of Public Instruction, OSPI), waxa uu kormeeraa waxbarashada K-12, ku taageeraa ardayga iyo qoysaska qaabab kala duwan, oo ay kamid yihiin:

1. **Sharci Samaynta.** OSPI waxay ka masuul tahay dhaqan gelinta shuruucda ilaaliya danaha ardayda iyo inay siiyaan nidaam ay tahay inay dhamaan degmadu waxa raacdo. OSPI waxay dhawaan dhaqan gelisay shuruucda gobolka ee anshax marinta ardayda. Shuruucda shruudaha cusub ee luuqada fudud ee waadaxa ah ee qoysaska iyo degmooyinka. Shuruucda cusub waxay siiyaan ardayga iyo qoysaska fursado badan oo ay kaga qayb geli karaan hawlaha go'aan gaadhida ee heer deegaan. Websaytka Anshaxmarinta Ardayda OSPI waxa laga helayaa macluumaad ku saabsan shuruucda gobolka ee anshaxmarinta ardayda.
2. **Taageerada farsamo.** OSPI waxay siisaa macluumaad iyo khayraadka ardayda iyo qoysaska kiis kiis.
3. **U hogaansanaanta xuquuqda madaniga ah.** OSPI waxay siisaa taageero qoysaska walaac ka qaba takoor darteed inay ka timid anshaxmarinta maamulku. Tusaale ahaan, hadii aad aaminsan tahay in degmada dugsigu ay si ka gedisan ula dhaqantay ilmahaaga qoomiyada uu kasoo jeedo, dhalashadiisa, jinsigiisa, laxaad la'aantiisa, ama wixii kale ee reeban darteed, Xafiiska Sinaanta iyo Xuquuqda Madaniga ah ee OSPI waxa uu kusoo nayaa macluumaadka ku saabsan (1) xuquuqdaada iyo (2) sida loo xareeyo dacwada.
4. **Khayraadka.** OSPI waxay samaysaa khayraad dheeraad ah oo qoysaska iyo degmada dugsiga loogu talo galay, oo ay kamid yihiin tobobarada qaababka waxbarista, si gacan looga gaysto natiijada anshaxmarinta ardayga.

### Wixii Xog Dheeraada ah

- OSPI waxay ku dhiiri gelisaa dugsiyada degmada inay isticmaalaan nidaamyada iyo khidadada ay kamidka yihiin Muujinta Hadhqanaka Nidaamyada iyo Khiddadaha Ugu Wanaagsan.
- Anshaxa Ardayda OSPI: Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shuruucda anshaxmarinta gobolka, shuruucda cusub ee anshaxmarinta, iyo khayraadka OSPI.
- Wixii su'aalo ama tabasho ah ee ku saabsan takoorka, la xidhiidha Xafiiska Sinaanta iyo Xuquuqda Madaniga ah ee OSPI.

